

LIGHT

READING

customer newsletter

Jan/Feb 2008

Xilligii dabeylaha ayaa la gaaray



Cimilada dabeylaha wadata ayaa ugu wayn waxa keena korontada kala go'da. Waxaad u diyaar noqon kartaa adigoo aqalkaaga, baabuurkaaga, goobta shaqada ku diyaarsada alaabada degdegga ah, sida: tooshka, saacadda la buuxiyo, raadiyaha la qaadan karo, bustada *mylar*, qoryaha iftiima iyo batteriyaal. Ha isticmaalin shumacyada holaca bixiya marka ay korontada maqan tahay sababto ah waa khatar. Si aad wax dheeraad ah uga ogaato sida loogu diyaar noqdo korontada kala go'da, waxaad eegtaa bogga internetka www.seattle.gov/light/ ama www.seattle.gov/emergency/ ama www.govlink.org/3days3ways/.

Macluumaadka aasaaska ah ee jeneraytarada korontada

- Marwalba waxaad jeneraytarada la qaadan karo ku shidaa dibedda, meel ka fog daaqaadaha iyo meelaha ay hawada ka soo gasho. Qaaca ka baxa jeneraytarada wuxu keeni karaa dhimasho. Waxaa muhiim ah in qaaca dibedda loo saaro si uu aqalka gudihiisa u soo galin.
- Jeneraytaradu waxay ku kala duwan yihiin qiimaha, awooda iyo nooca. Nooca ugu fudud waa jeneraytarka yar ee la qaadan karo oo korontada dhaliya iyadoo la adeegsanayo fiilo dheer oo si toos ah loogu rakibo qalabka gaarka ah ee la doonayo in la shido, sida qaboojiyeyaasha iyo nalalka.
- Marka aad isticmaalayso jeneraytarada tamarta dhaliya, waxaad marwalba raacdaa qoraalka shirkadda soo saarta.
- Marna si toos ah jeneraytarka ha ugu rakibin fiilooyinka korontada ee aqalka. Tamarta jeneraytarka ee sida joogtada ah ugu rakiban qalabka korontada, sida kul siiyaha guriga iyo kuleyliyaha biyaha, wuxuu jeneraytarka u baahan yahay nidaam koronto oo ka dhib badan kuwa caadiga ah. **Furaha dabka beddela** ayaa loo baahan yahay si uu jeneraytarka tamarta aqalka uga siiyo nidaamka korontada. Furaha waa in uu rakibo farsame yaqaan koronto oo shati leh, oo ay eegaan Waaxda Qorsheynta iyo Horumarinta Seattle, oo ay ansixiyaan Seattle City Light.
- Qalabka korontada ee sida khaladka ah loo rakibo waxay aad khatar ugu yihiin reerkaaga iyo shaqaalaha korontada.

Haddii aad dooneysid macluumaad dheeraad ah, waxaad booqataa bogga internetka www.metrokc.gov/permits/fire/safety/generators.aspx.



Macaamiisha ha ka taxaddiraan

Macaamiisha magacyadoodu dambe uu ajnabi yahay iyo waayeelka waxay mararka qaarkood taleefoon ka helaan dad khayaano wata oo sheeganaya in ay yihiin shaqaale ka tirsan City Light. Qofkaasi, isaga ama iyada waxay sheegaan in ay dhibaato ka jirto biilka korontada ee macaamilka waxayna ku waydiisanayaan in aad u sheegto lambarka kaarka bangiga ama daynta si arrintaasi wax looga qabto.

- Taleefoon ha ku siin macluumaadka kaararkaada. Waxaad ka qaadataa magaca iyo lambarka taleefoonka qof kasta ee soo waca ee isku sheega in ay yihiin shaqaale ka tirsan City Light.

LIGHT READING

customer newsletter



Macaamiisha ha ka taxaddiraan (socota)

- Waxaad ka wacdaa City Light taleefoonka **(206) 684-3000** saacadaha la shaqeeyo (Isniinta - Jimcaha, 7:30 subaxnimo illaa 6:00 fiidnimo) si aad u ogaato haddii ay dhibaato ka jirto bixinta biilka korontada. Waxaad la socodsiiisaa qofka ku soo wacay ee ku weydiyay macluumaadka kaarkaada.
- Seattle City Light marna macaamiishooda taleefoon kuma weydiyaan macluumaadka kaarkooda si ay biilka korontada u bixiyaan.
- Ma wacno macaamiisha xilliyada shaqada laga fadhiyo ee dhammaadka toddobaadka.
- City Light waxay macaamiishooda korontada laga goyn rabo u soo diraan ugu yaraan laba ogeysiis oo qoraal ah haddii ay tahay biilasha aan la bixin. Waxaannu macaamiisha ka codsanaa in ay nala soo xiriiraan si ay biilasha u bixiyaan.

Dadka kale ee la caawiyo

Haddii aad dooneyso in aad caawiso dadka ku dhibaateysan bixinta biilashooda korontada, waxaad fadlan soo wacdaa **(206) 684-3000** ama ugu tabarrucdaa cinwaanka internetka www.seattle.gov/light/help/share/. Deeqda aad ku tabarrucdo waxaad u adeegsan kartaa canshuur dhaafka, waxayna boqolkiiba 100 si toos ah u anfacaysa macaamiisha baahida qaba. Barnaamijka Mashruuca Wadaagga ee City Light waxaa lagu maalgeliyaa deeqaha tabarruca ah ee macaamiisha laga helo oo kaliya.

Si lagaaga caawiyo bixinta biilasha korontada iyadoo loo maraayo barnaamijka Mashruuca Wadaagga, waa in ay macaamiisha shuruudo soo buuxiyaan. Haddii aad su'aalo ka qabtid Mashruuca Wadaagga ama barnaamijyada gargaarka ee dadka dakhligoodu yar yahay, waxaad wacdaa **(206) 684-3000**.

Hay'adda Seattle City Light iyo dadka hela gargaarka Mashruuca Wadaagga waxay idin leeyihiin, **mahadsanidiin!**

Ogeysiiska ku socda macaamilkayaga

Biilasha adeegyada korontada waxaa caadi ahaan loo adeegsadaa caddeynta halka aad ku nooshahay. Magacyada qof kasta oo bixiya biilka waa in uu ku yaal akoontada. Haddii uu magacaagu ku qorneyn akoontada, ma caddeyn kartid halka aad ku nooshahay. Waxaad wacdaa **(206) 684-3000** si aad u codsatid in aan ku darno ama ka saarno magacyada akoontada. Fadlan la diyaar noqo cinwaankaaga iyo lambarka akoontada marka aad soo wacayso.

Caddeymaha la xiriira guluubyada yar ee fluorescent-ka iyo meerkuriga

- Guluubyada noocyada ENERGY STAR ee CFB-yada waxaad ku helayaa qiimo aad uga jaban noocyada kale. Si aad u hesho meesha aad ka iibsan karto guluubyada waxaad eegtaa bogga internetka www.seattle.gov/twistandsave.
- City Light waxay soo saareen barnaamijka dhaqaaleynta tamarta sababtoo ah guluubyada ENERGY STAR ee CFB-yada waxay isticmaalaan qiyaas ahaan 75% tamar ka yar inta guluubyada caadiga ah isticmaal. Intaa waxaa sii dheer guluubyada ENERGY STAR 10 jibaar by ka cimridheer yihiin kuwa caadiga ah.
- CFB-yada waxaa laga helaa macdanta meerkuriga, oo khatar keeni karta haddii hawada lagu sii daayo haddii uu guluubka jabo (www.epa.gov/mercury). Isticmaalka CFB-yada aad ayuu amaan u yahay. Ha ku ridin CFB-yada qashinka. Waa in dib loo warshadeeyo.
- Macluumaadka dibu warshadeynta CFB-yada waxaa laga helayaa www.takeitbacknetwork.org ama iyadoo la wacaayo **(206) 296-4466**. Ganacsiyada qiime yar ayeey uga qayb qaataan dibu warshadeynta CFB-yada iyo tubooyinka fluorescent-ka.